



Caafimaadka Dumarka ee dhinaca Waqooyigu (WHIN) waa adeega caafimaadka dumarka qaybta ee loogu talagalay Waqooyiga Melbourne.

SIDAAN U SHAQEYNO

WHIN, waxay taageertaa caafimaadka iyo fiyoobaanta dumarka iyadoo siineyna nashaad kor loogu qaadayo caafimaadka kalana duwan oo ay ka mid yihiin macluumaadka, waxbarashada, tababarka iyo adeegyada la tallinta.

Waxaan ku takhasusnay fulinta baahida dumarka 'khatarta' ugu badan ugu jira arimaha la xiriira nidaamka caafimaadka – kuwaas oo ay dhaqan ahaan, bulsho ahaan ama dhaqaale ahaan ay xaaladuhu si xun u saameeyaan caafimaadkooda iyo fiyoobaantooda.

Waxaa naga go'an wadashaqeynta, iyo inaan si shirko ah ula shaqeyno adeegyada kale ee qaybaha si loo hagaajiyo natiijada caafimaad ee dumarka loogu talagalay.

WAA MAXAY SABABTA CAAFIMAADKA DUMARKU

WHIN waxay aqoonsataa in caafimaadka iyo fiyoobida ee qof kasta oo dumar ah inay gooyaan qodobada bulshada, dhaqanka iyo dhaqaale ee xukuma nolosheeda – oo aan ahayn oo kaliya siday tahay xaaladeeda caafimaad. Fakhriiga, masuuliyada xannaanada carruurta, waalidnimada kelida ah, mushaararka hoose, shaqaqada qoyska iyo waxyeelada galmada waa qaar ka mid ah qodobadaan.

Waxaan u shaqeynaa siyaalo lagu abuurayo natiijada ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah ee natiijooyinka caafimaad ee loogu talagalay dumarka. Shaqadeenu waxay taageereysaa dumarku inay gartaan oo ay doorashooyinkooda isticmaalaan oo ku saabsan caafimaadka iyo inay sameeyaan go'aamo ay xogta ay ku saleynayaan oo dhan hayaan.

WAXAAN QABANO

WHIN waxaa ka go'an in 'sameynta dhammaan kala duwanaanta' ee caafimaadka iyo fiyoobida dumarka degan waqooyiga Melbourne.

Waxaan siinaa:

- **Adeegyo macluumaad**, ilo macluumaad iyo tallo dumarka iyo ururada.
- **Waxbarashada Caafimaadka** kooxaha dumarka ah ee bulshada.
- **Tababarka Aqooneed** ee adeeg bixiyayaasha caafimaadka dumarka.
- **U doodida** si loo taageero, kor loogu qaado loona horumariyo arimaha caafimaadka dumarka.
- **Cilmi baaris** baarta, warbixinada oo daabacda arimaha caafimaadka dumarka.
- **Kor u qaadida Caafimaadka** iyo mashruucyada bulshada lagu horumarinayo si loo hagaajiyo caafimaadka dumarka.

GOOBTAAN KA SHAQEYNO

WHIN waxay bixisaa adeegyo loogu talagalay dumarka ku nool iyo/ama ka shaqeeya Banyule, Darebin, Hume, Moreland, Nillumbik, Whittlesea, ama/iyo Yarra.

KU LUGYEELO

WHIN waa urur xubin laga noqon karo oo u furan dumarka ku nool ama ka shaqeeya waqooyiga Melbourne.

Xubinnimada aan buuxini waxay sidoo kale u furan tahay dumarka iyo ururada ka shaqeeya qaybta waqooyi.

Xubnimadu waa bilaash.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ama si aad u hesho foomka codsiga xubinnimada, nala soo xiriir Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 9.30 subaxnimo ilaa 5.00 galabnimo.

Women's Health In the North (WHIN)

680 High Street, Thornbury 3071

Telephone: 94841666 Facsimile: 94841844 Email: info@whin.org.au Website: www.whin.org.au

Reg No: A0026656G ABN: 72418921651